Xaashida macluumaadka
baaritaanka afka ilmogaleenka

Somali

Waa maxay baaritaanka afka ilmogaleenka?

Baaritaanka afka ilmogaleenka wuxu hubiyaa caafimaadka afka ilmogaleenka. Afka ilmo-galeenka waa iridda makaankaaga marka xubintaada taranka laga fiirsho. Baaritaanka afka ilmo-galeenka waa habka ugu fiican ee aad iskaga ilaalin karto kansarka afka ilmo-galeenka.

Maaha baaritaan lagu ogaado kansarka. Waa baaritaan kaalmo ka geysan karaa **ka hortaga** in kansar qofka ku dhaco.

Waa habka ugu fiican ee aad uga hortagi karto inuu kugu dhaco kansarka afka ilmogaleenka markaas marnaba ha ka daahin baaritaanka afka ilmogaleenka marka waqtigiisa la gaaro.

Waa maxay baaritaanka HPV-ga afka ilmogaleenka?

Kani waa hab **cusub** oo loo baaro afka ilmo-galeenka. Waxa la dhahaa baaritaanka afka ilmogaleenka ee HPV waxana Ireland lagu soo kordhiyay sannadkii 2020. Noocan baaritaanka afka ilmogaleenka ah waxa horey loogu soo bandhigay Ustareeliya, Nederlaan, Iglan iyo Waylis. Baaritaankaaga afka ilmo-galeenka waxa marka hore laga fiiriyaa fayraska babillomafayras ee dadka (HPV) - fayras sababi kara kansarka afka ilmo-galeenka.

Haddii HPV lagaa helo, isla muunadda baaritaanka waxa laga fiirshaa inay afka ilmogaleenkaaga ku jiraan wax unugyo aan caadi ahayn (kansarka hordhac u ah).

Baaritaanka qaabkan ah:

- waa hab fiican oo loo baaro afka ilmo-galeenka
- wuxu ka hortagaa kansarka
- wuxu ka dhigan yahay in dadka qaarkood mari doonaan baaritaano tiro yar

Haddii aad horay u martay baaritaanka masaxaadda, baaritaanka afka ilmogaleenkuna isku si baad ku dareemaysaa.

Sidee baa baaritaanka afka ilmo-galeenka ee HPV loo sameeyaa?

Baaritaanku wuxu caadiyan qaataa qiyaastii 5 daqiiqadood.

1. Waxa lagaa codsan doonaa inaad dharka ka faydo wixii dhexda ka hooseeya oo aad ku jiifsato kursi fidsan.
2. Waxaad u jiifsan kartaa dhinac ama dhabarka, labada hadba midkii aad raaxo ku dareemayso.
3. Dhakhtar ama kalkaaliso caafimaad ayaa si deggan qalab la yidhaahdo kala-fidiye (speculum) u gelin doontaa xubintaada taranka. Tani waxay kala furi doontaa gidaarada xubintaada taranka, si ay u arki karaan afka ilmogaleenkaaga.
4. Burush yar, oo jilicsan ayaa la isticmaali doonaa si unugyo muunad ah looga soo qaado afka ilmogaleenka.

Dadka qaar waxay hawshan ku dareemaan xoogaa raaxodarro ama yaxyax ah, laakiin inta badan wax xanuun ah ma leh. Haddii aad baaritaanka ku xanuunsato, u sheeg dhakhtarka ama kalkaalisada maadaama ay xanuunka kaa yareyn karaan.

Waa maxay faa'iidooyinka baaritaanka afka ilmo-galeenka?

Baaritaanka HPV ee afka ilmogaleenka ee caadiga ah:

- wuxu badbaadiyaa nafo
- waxa lagu ogaan karaa fayraska HPV ka hor intaanu unugyo xanuunsan ku dulsameyn afka ilmogaleenka
- waxa lagu ogaan karaa unugyada xanuunsan kar hor intaanay astaamo soo bixin
- waxa lagu ogaan kara unugyada xanuunsan ka hor inta ay fududahay in la daaweeyo

In HPV iyo unugyada xumaaday goor hore la ogaado waa habka ugu fiican ee looga hortago inuu kansar qofka ku dhaco.

Tani waa sababta inaad baaritaano joogto ah marto ay muhiim u tahay.

Waa maxay xaddidaadaha baaritaanka afka ilmo-galeenku leeyahay?

Xaddidaadaha ugu badan ee baaritaanka afka ilmogaleenku leeyahay waa:

- baaritaanka afka ilmogaleenka laguma ogaado dhammaan kiisaska kansarka afka ilmogaleenka
- dadka qaar ayaa yeelan doona kansarka afka ilmogaleenka iyadoo uu baaritaanku caadinimo muujiyay
- unugyo xanuunsan ayaa baaritaanku seegi karaa
- waxa laga yaabaa inaanu unug kasta oo buka ogaan
- mararka qaarkood baaritaanku natiijo qaldan ayuu soo saari karaa

Maxaa lagu sameynayaa muunadda baarista ee la iga qaado?

Muunadaada waxa la geyn doonaa shaybaar tayadiisa la hubiyay. Shaybaarka marka la geeyo muunadaada waxa laga baari doonaa inay leedahay caabuqa fayraska HPV. Haddii aad qabto caabuqa HPV oo kacsan, laba khubaro ah ayaa unugyada jirka ee muunadda ka fiirin doona wax isbeddelo ah. Haddii ay wax isbeddelo ah jiraan, waxaad u baahan doontaa baaritaan kale oo la dhaho ilaysku-fiirinta afka ilmogaleenka (colposcopy). Kolboskobi waa baaritaan si faahfaahsan loogu fiirinayo afka ilmogaleenkaaga.

Waa maxay sababta unugyada aan caadiga ahayn (buka) qaarkood loo arki waayo?

Muunadda lagaa qaaday waxa marka hore laga eegayaa HPV. Haddii HPV laga helo, waxa sidoo kale laga eegaya inay ku jiraan unugyo buka.

Laakiin qof kasta oo qaada kansarka afka ilmogaleenka lagama helo HPV marka la baaro.

Baaritaan laga waayay HPV - aan muunadda lagu arkin HPV - sidoo kale kama dhigna in aadan cudurka qaadayn mustaqbalka.

Unugyada buka mararka qaarkood waa la arki waayaa sababtoo ah:

- mararka qaarkood unugyada buka waxay u eegyihiin kuwa caadiga ah
- waxa dhici karta inay tirada unugyada buka ee muunadda ku jirta aad u yartahay
- waxa laga yaabaa in qofka fiirinaya muunadu arki waayo unugyada buka (tani way dhacdaa si kastoo qofku xirfad hawsha ugu leeyahay)

Ma jiro baaritaan, barnaamijkuu doono ha ka tirsanaadee, ogaan kara qof kasta oo unugyada afka ilmogaleenkiisu bukaan.

Kansarka afka ilmogaleenku sannado badan ayuu ku sameysmaa. Inta badan, waxay qaadataa 10 illaa 15 sannadood si unugyada caadinimada isaga beddelaan uguna sii gudbaan kansar.

Tani waa sababta ay muhiimka u tahay inaad baaritaankaaga afka ilmogaleenka xilligiisa ku marto.

An tSeirbhís Náisiúnta Scagthástála
National Screening Service

Plain English
Approved by NALA

CervicalCheck
AN CLAR NAISIUNTA SCAGTHASTALA CEIRBHEACS
THE NATIONAL CERVICAL SCREENING PROGRAMME

CS/PUB/CC-77 Rev 1.

Xaashida macluumaadka
baaritaanka afka ilmogaleenka

Somali

Sidee baan ku ogaan doonaa natiijada baaritaankayga?

Natiijooyinka waxa laguugu soo diri doona boosto ahaan, caadiyan 4 todobaad baaritaanka ka dib. Waxa sidoo kale loo diri doonaa dhakhtarkaaga qoyska (GP) ama xarunta caafimaadka.

Maxay la macno yihiin natiijooyinka baaritaankaygu?

Waxa jira afar natiijo oo soo bixi kara

1. HPV lagamaa helin

Natiijooyinku waxay muujinayaan inaan lagaa helin HPV markan. Waxaad baaritaanka afka ilmogaleenka ee xiga mari doontaa 3 ama 5 sannadood ka dib iyadoo ku xiran da'daada.

2. In HPV lagaa helo laakiin aan wax unugyo xumaaday ah lagu arkin muunadda.

Natiijooyinkaagu waxay muujinayaan inaad qabto caabuqa HPV **laakiin** wax unugyo buka ah laguma arag muunadda baaritaanka. Waa inaad baaritaan kale marto 12 bilood hadda ka dib. Tani waxay jirkaaga fursad u siinaysaa inuu iska nadiifiyo caabuqa HPV.

3. In HPV lagaa helo oo unugyo xumaadayna la arko

Natiijooyinkaagu waxay muujinayaan inaad qabto caabuqa HPV oo unugyo xumaadayna lagu arkay afka ilmogaleenkaaga. Waxaad u baahan tahay baaritaan kale oo kan xiga oo loo yaqaano iftiin-ku-fiirinta afka ilmogaleenka (colposcopy) - waa baaritaan si faahfaahsan u eegi doona afka ilmogaleenkaaga. Wuxu la mid yahay baaritaanka afka ilmogaleenka.

4. Muunaad baaritaan aan ku filnayn

Tani waxay la macno tahay in shaybaarku baari kari waayay muunadaadii baaritaanka. Waxa lagaa codsan doonaa inaad baaritaankaaga afka ilmogaleenka dib ugu celiso muddo saddex bilood ah ka dib.

Oggolaansho bixinta

Markasta oo aad marayso baaritaanka afka ilmogaleenka waxaanu kaa codsan doonaa inaad ogolaansho na siiso adigoo saxiixi doona foomka baaritaanka afka ilmogaleenka ka hor intaadan baaritaanka marin. Haddii aad foomka saxiixi karayn, waxa lagaa codsan doonaa inaad oggolaansho ku bixiso hadal ahaan ama inaad foomka calaamadiso adigoo la jooga dhakhtar ama kalkaaliso.

Tan waxa loola dan leeyahay in lagu xaqiijiyo:

- in laguu sheegay waxa baaritaanka afka ilmogaleenku yahay iyo faa'iidooyinkiisa iyo xaddidaadihiisa
- inaad fahamtay macluumaadkan
- inaad hubisay in magacaaga, cinwaanka iyo tafaasiisha kale saxan yihiin (tani waxay hubinaysaa inaanu hayno cinwaankaaa hadda si aanu kuula soo xiriiri karno)
- inaad noo ogolaatay inaanu helno, hayno oo la wadaagno xogtaada shaqsiga ah iyo taariikhdaada baaritaan dadka maamula barnaamijka baaritaanka HPV ee afka ilmogaleenka

Xasuusnoow: Adiga oo keliya ayaa bixin kara ogolaanshaha aad kaga qaybqaadanayso barnaamijkeena. Waa inaad oggolaato ka hor inta aadan marin baaritaanka. Oggolaanshahaaga waad la laaban kartaa markasta adigoo la soo xiriiraya Taleefanka wicista bilaashka ah ee **1800 45 45 55** ama iimayl u soo diraya **info@ cervicalcheck.ie**

Tani waxay la macno tahay in aanan mustaqbalka kuu soo sheegi doonin wax ku saabsan barnaamijka baaritaanka afka ilmogaleenka.

Sidee baanu u isticmaalaynaa macluumaadkaaga shaqsiga ah?

CervicalCheck waxay qabtaan oo si xafidan u kaydiyaan macluumaadkaaga shaqsiga ah (magaca, cinwaanka, lambarka taleefanka, taariikhda dhalashada, PPSN, magaca awoowaha ee qofku ku dhashay iyo magaca hooyada ee guurka ka hor) iyo taariikhda baaritaanka afka ilmogaleenka. Taariikhdaada baaritaanka afka ilmogaleenka waxay la xiriirtaa ka qaybgalkaaga CervicalCheck.

Waxa ku jiri kara natiijooyinka baaritaanka HPV ee afka ilmogaleenka, ka qaybgalka baaritaanka kolboskobi, daawaynaha iyo natiijooyinka cadka muunadda ah (biopsy).

Macluumaadkaaga waxaanu u adeegsan doonaa si aanu kuula soo xiriirno oo kuugu sheegno in baaritaankaagii xigay la gaaray iyo marka natiijadu soo baxdo. Waxa aanu macluumaadkaaga la wadaagi doonaa adeegyada kale ee caafimaad ee barnaamijka wada. Kuwan waxa ka mid ah dhakhtarka ama kalkaalisada baaritaanka sameynaysa, shaybaarka, xarunta shaybaarka kolboskobiga iyo Diiwaanka Kansarka ee Waddanka Ireland. Waxa tan loogu talagalay in la joogteeyo oo la horumariyo tayada adeegga.

Waxa laga yaabaa inaanu muunadda baaritaankaaga u adeegsano waxbarasho, qiimeyn iyo kormeer ahaan iyo inaanu ku fiirino tayada iyo waxtarka barnaamijka. Waxa sidoo kale laga yaabaa inaanu macluumaadkaaga u adeegsano inaanu kugu soo martiqaadno ka qaybqaadashada cilmibaaris.

Waa ikhtiyaarkaaga inaad baaritaanka ka qaybqaadato iyo inaad iska dayso. Marnaba magacaaga ma isticmaali doono xilliyada waxbarashada iyo qiimeynaha. Xogtaada shaqsiga ah waxaanu u ilaalin doonaa qaab xafidan oo qarsoodi ah oo waafaqsan shuruucda ilaalinta xogta ee hadda.

Si buuxda ayaad marin ugu heli doontaa macluumaadka shaqsiga ah ee ay CervicalCheck kaa hayso marka aad codsato. Waa muhiim inaad CervicalCheck ku soo wargeliso haddii macluumaadkaagu isbeddelo. Si aad u eegto sida aad ku heli lahayd xogtaada, fiiri **hse.ie/gdpr/data-requests/**

Wixii macluumaad dheeraad ah Ogeysiiska Sirnimada Xogta ee HSE - Bukaanada iyo Isticmaalayaasha Adeegyada ka fiiri barta **hse.ie/gdpr/**

Sida laguula soo xiriirayo

Waxa aanu kuula soo xiriiri doonaa qaab furan, daacad ah, waqtiyaysan oo banyaal ah haddii:

- wax ka qaldamaan daryeelkaaga
- aad la kulanto dhibaato ka dhalatay daryeelkaaga
- aanu u malayno inay dhibaato ku soo gaartay

Tani waxay ka dhigan tahay inaanu si buuxda kuugu wargelin doonno xaqiiqooyinka iyo tafaasiisha ku saabsan ka qaybgalkaaga barnaamijka baaritaanka afka ilmogaleenka.

Marka ay natiijadaadu na soo gaarto, waanu kuu soo diri doonaa iyadoo aanu kuu soo raacinay waxa natiijadu la macno tahay. Waxaad sidoo kale macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa **hse.ie/cervicalcheck**

An tSeirbhís Náisiúnta Scagthástála
National Screening Service

Plain English Approved by NALA

CervicalCheck
AN CLAR NAISIUNTA SCAGTHASTALA CEIRBHEACS
THE NATIONAL CERVICAL SCREENING PROGRAMME

CS/PUB/CC-77 Rev 1.

CervicalCheck
AN CLAR NAISIUNTA SCAGTHASTALA CEIRBHEACS
THE NATIONAL CERVICAL SCREENING PROGRAMME

Foomka baaritaanka afka ilmo-galeenka

Foomamka aan dhammeystirnayn waa la celin karayaa.
Fadlan macmiilka ka soo xaqiiji in dhammaan tafaasiisha ku qoran foomka saxan tahay.
Marka la xaqiijiyo fadlan lambarka quraaradda ka jar calaamadda muunadda oo ku dheji foomka.

Lambarka quraaradda:

A. Tafaasiisha Macmiilka

Lambarka Adeega Dadwaynaha Ee Shaqsiga ah: (Lambar / Waraaqo)

CSPID

Lambarka Isbitaalka (haddii uu u qalmo)

Taariikhda Dhalashada (Maalinta / Bisha / Sannadka)

Magaca awoowga Isticmaal XARFO WAAWAYN

Magaca Koobaad

Magaca Dhexe

Magaca Awoowga ee aad ku dhalatay:

Magaca hooyada ee asalka ah

Cinwaanka Boosta oo Dhammeystiran (Warqadda natiijada cinwaankan ayaa loo soo diri doonaa)

Eircode:

Taleefan lambar:

B. Ogolaansho

Waan hubiyay in dhammaan xogtayda kor ku qorani sax tahay.

Waan akhriyay oo fahmay macluumaadka la i siiyay. Waxaan ogolaaday inaan ka qaybqaato Baaritaanka Afka ilmogaleenka (CervicalCheck).

Saxiixa macmiilka: _____

CervicalCheck ma oggola in cid saddexaad oo macmiilka metelaysa oggolaanshaha bixiso illaa ciddaasi tahay xubin qoyska ah ama daryeel haysta awood sharci oo khaas ah oo ay sidaas ku sameyn karaan.

C. Tafaasiisha Dhakhtarka ama Xarunta Caafimaadka Qandaraaska qaatay

Lambarka Diiwaangelinta Golaha Caafimaadka ee dhakhtarka qandaarska qaatay:
AMA
Koodhka caafimaadka:
(CUN COLP GYN PPCC STI ama ONG)

Magaca Dhaqtarka ama Xarunta Qandaraaska Qaadatay:

Cinwaanka:

Taleefan lambar.

D. Tafaasiisha muunadqaadaha

MCRN ama NMBI

Magaca muunad-qaadaha:

E. Macluumaadka Baaritaanka Afka Ilmo-galeenka

Taariikhda dhalashada (Maalinta / Bisha / Sannadka)

Muunada goobta

☐ Afka Ilmo-galeenka ☐ Afka (ka dib marka ilmogaleenka la jaro)

Marka afka ilmo-galeenku jiro, qofka shaybaarka qaadaya waa inuu fiiriyo guud ahaan afka ilmo-galeenka oo muunadda si sax ah uga qaado isagoo xaaqinka/burushka 5 x 360° ugu wareejinaya. Soo gudbinta muunada waxay xaqiijinaysaa in muunada sidaas loo qaaday.

F. Tafaasiisha caafimaad ee ku habboon

LMP (Maalinta / Bisha / Sannadka)

☐ OCP/Hoormoono/HRT
☐ IUCD
☐ Dhalmadayska ka dib
☐ Kahor/ka-dib Xubno-beerista
☐ Kelyo-sifayn
☐ Qaba cudurka Aydhiska (HIV)
☐ Dhiigbax galmada ka dib ah
☐ Dhiigbax dhalmadaysaka ka dib ah
☐ Ilmogaleen jaris qayb ah
☐ Jarista Dhammeyska tiran ee Ilmogaleenka

G. Taariikhda Baaritaanada iyo Daawada

LABORATORY USE ONLY SHAYBAARKA OO KELIYA AYAA ISTICMAALAYA

Taariikhda ay xarunta Shaybaarka soo gaartay (Maalinta / Bisha / Sannadka)

Lambarka gelitaanka

10 | 20

Unugyada TZ Haa ☐ Maya ☐

Dariiqa

Soo-jeedinta maamulka

Taariikhda La Soo Sheegay

Saxiix

Sample